

BARTAMAHA SEATTLE ILAA MT. BAKER ILAA RAINIER BEACH

NAGU CAAWI QAABEYNTA RAINIER AVE S IYO KOR U QAADIDDA ADEEGGA BASKA

Sida ugu dhakhshiyaha badan 2021, Baska 7 ee King County Metro waxaa loo dallacsiin doonaa RapidRide! Khadka cusub ee RapidRide Rainier wuxuu isku xiri doonaa bartamaha magaalada Seattle, Chinatown-International District, Mt. Baker, iyo Rainier Beach oo saaran Rainier Ave S. Khadka Rainier RapidRide Line wuxuu dadka u fududeyn doonaa socodka:

- Wuxuu basaska ka dhigayaa isdaba joog lagu kalsoon yahay
- Soo kordhiya basas dheeri ah habeenkii iyo toddobaadka dhamaadkiisa
- Horumar iftiin ah oo lagu sameeyo goobaha istaagga baska RapidRide iyo waqtiga imaatin sugan, iyo arrimo kale

MAXAA LOO KEENAYAA RAPIDRIDE WADDADA RAINIER AVE S?

Khadka hadda jira ee 7 waxa uu ka mid yahay khadadka loogu raacis badan yahay Seattle, isagoo u adeega 11,000 raacayaal maalin kasta oo kala aada meelo kala duwan sida iskuullada, guryo, iyo beeraha nasiinnada. Iyadoo basaska 7 waqtiga socokoodu ku saleysan yahay 10 daqiiqo ama ka hor, ciriiriga waddooyinka waxa sababaan in basasku socodkoodu 40% ka gaabnaadaan waqtigooda ama dib u dhac 5 daqiiqo ah ilaa daahid gaareysa 20 boqolkiiba inta badan.

Waddada Rainier Ave S ma ahan oo kaliya mid loo qaabeeyey jid xamuul oo u baahan leeman ballaaran si gawaarida taraagga ugu adeegaan ganacsatada xaafadda, waxey kaloo leedahay shilalka ugu badan ee baabuurta ee waddooyinka magaalada. Horumarka la qorsheynayo in lagu sameeyo RapidRide Rainier ma hagaajin doono oo kaliya ku tiirsanaanta iyo waqtiga safarka, balse sidoo kale wuxuu u abuur doonaa raacayaasha goobo ammaan ah.

DHISIDDA ISKU XIRAN DHAMMAAN WADDADA RAINIER AVE S


Waxannu rabnaa wax hagaajin dan u ah dhammaan musaafiriinta, haddii aad socoto ama bas aad isticmaaleyso, ama gaari, ama baaskiil. Iyadoo qeyb ka ah wadahalkeena ku saabsan RapidRide, waxannu idinla wadaagi doonaa wixii ka soo kordha dadaallada si loo yareeyo isku dhaca baabuurta, loo hagaajiyo adeegga baska, iyo in xamuulku si sahlan isaga goosho Rainier Ave S. Ka ogow wax badan seattle.gov/Transportation/SoutheastSeattle



Noogu sheeg waxey kula tahay ilaa

Abril 8, 2018

RapidRideRainier.participate.online



White Center
Not to Scale
Data Sources: City of Seattle, King County

Transit Network

- Khadka RapidRide Rainier
- RapidRide-yada kale
- Isku Xirka Muhiimka ah
- Link
- Seattle Streetcar

Suurto galmimada arrimaha ku iman kara waddada Rainier

- Nalal caqli leh oo mudnaanta siiya basaska
- Hab cusub or la habeeyey oo madaxa u saaran basaska korontada ku shaqeeya
- Leeman u gaara bas kaliya ama goobaha ganacsiga oo basaka u sahlaya socodka
- Laamiyeyn
- Goobo socod cusub ama la hagaajiyey
- Meelo Baaskiilladu ka goyaan

SANDUUQA QALABKA RAPIDRIDE

Khadka RapidRide Rainier wuxuu heysan doonaa waxayaabaha aad ugu jeceshahay baska 7, laakinse wuxuu kor u qaadi doonaa adeegga ugu wanaagsan ee King County Metro. Hareerta ku teedsan waddada, waxannu ka curin doonaa waxyaabaha soo socda:

LEEMANKA BASASKA U GAARKA AH

Leenka bas-kaliya wuxuu kala soocayaa basaska iyo baabuurta, wuxuu kordhinayaa dhaqsida iyo ku tiirsanaanta.



LACAG-KU-BIXINTA DIBADDA BASKA

Lacag-bixinta dibadda waxey sahleysaa in basku dhaqsi u dhaqaaqo isla markaas dadku soo koraan iyadoo saf lacag bixin lagu xaryirmo aaney dhicin.



NALAL CAQLI BADAN

Nalalka mudnaanta siiya baska waxey dheereeyaan ama shidaan calaamad cagaaran si ay u yareeyaan waqiga sugidda baska in nal u shidmo.



GOOBO SUGID BAS OO HORUMARSAN

Xarumaha sugidda RapidRide waxa ka mida warbixin waqiga imaatinka saxda ah, dugaallo waaweyn, iftiin, iyo waxyaabo kale.



BASAS GAAR AHAANEED

Basaska korontada ee RapidRide waxey leeyihiin mug iyo sagxado hoose oo si sahlan lagu raaco karo ama looga dego karo.




ISKU XIRKA BAASKIILLADA IYO SOCOTADA IYO BASASKA

Hagaajinta meelaha jid gooyada ah, xaafadaha waddooyinka cagaaran, iyo leemanka baaskiillada waxey dadka ka caawiineysaa iney helaan khadad cusub oo RapidRide ah.




LAAMIYEYNTA

Laamiyeynta waddooyinka halkii looga baahdo si loo abuuro jidad siman oo baabuurta iyo basasku si raaxo leh ugu safaan.



JADWALKA MASHRUUCA



MAAL-GELINTA

Canshuurtii sagaalka sano, \$930 milyan ee Move Seattle waxey bixineysaa qeyb ka mida maalgelinta Barnaamijka Ballaarinta RapidRide. SDOT waxey la mataanoobeysaa King County Metro si ay u dabo gasho baarnaamijyo deeq maal-gelinnu iyo fursado kale oo isbaheysi ku dhisan si lacagta loogu daboolo dhamaan qarashka ku baxaya barnaamijka.

KHADADKA CUSUB RAPIDRIDE EE IMANYA SEATTLE

Si loo fidiyo helitaan joogto ah iyo adeegyo lagu kalsoon yahay, waxannu la bahownay King County Metro Transit si aannu ugu soo kordhinno Seattle 7 khadad cusub oo RapidRide ah. Ka daawo unugga cusub mustaqbalka RapidRide ee Seattle xaggan seattle.gov/Transportation/RapidRideExpansion.htm

WARBIXINTA BARNAAMIJ IYO LA XIRIIR

Dawn Schellenberg, SDOT RapidRide@Seattle.gov
(206) 684-5189



Seattle
Department of
Transportation

